

Sharciyada Shaqaalaha Carruurta ah



Sharciyada Shaqaalaha Carruurta ah ee Gobalka Maine ayaa difaac siinaaya dadka ka yar 18 sano ee ka shaqeeya shaqooyinka beeraha iyo kuwa ganacsiyada kale. Waaxda Shaqaalaha ee Maine ayaa maamusha sharciyada, taasoo dhammaan loo shaqeeyaasha ay qasab tahay inay raacaan. Wakiillada waaxda ayaa kormeer ku samaynaaya goobaha shaqada si loo xaqiijiyiyo ku dhaqanka. Ganaaxyo iyo ciqaabo ayaa la saari karaa loo shaqeeyaasha aan u hogaansamin sharciga. Boorkaan wuxuu qeexayaa qaar kamid ah qaybaha muhiimka ah ee sharciyada. Nuqulka sharciyada saxda ah iyo turjumaada rasmiga ah ayaa laga heli karaa Waaxda Shaqaalaha, Laanta Sharciyada Shaqaalaha, adoo wacaaya 207-623-7900. (Sharciyada ayaa sidoo kale ku jira webseedka Laanta.)



Sharciga Maine (Farqada 26 M.R.S.A. § 42-B) ayaa qasab ka dhigaaya in loo shaqeeye kasta uu boorkaan ku dhajiyo goobta shaqada gaar ahaan meel ay shaqaaluhu si fiican u arki karaan

Boorkaan ayaa looga heli karaa barta oonleenka ah si bilaash ah waxaana laga samaysan karaa nuqul: <https://www.maine.gov/labor/posters/>

14 iyo 15 jirada ayaa ka shaqayn kara inta badan ganacsiyada, marka laga reebo shaqooyinka la cadeeyo inay khatar badan yihiin ayna halis gelinayaan caafimaadkood, badqabkooda ama fursadhooda waxbarashada. 16 iyo 17 jirada yaa ka shaqayn kara inta badan ganacsiyada, laakiin kama shaqayn karaan shaqooyinka khatarta badan. Shaqooyinka ayaa sidoo kale bixiya shardi dhaafyo kooban. La xariir Laanta Heerarka Shaqaalaha si aad u hesho faahfaahin.

Ogolaanshiyaasha Shaqada

- Dhammaan carruurta kayar 16 sano jir ayaa u baahan ogolaansho si ay si u shaqeeyaan.
- Kormeerayaasha dugsiyada ayaa xaqiijiyiyo tayadooda aqooneed.
- Ilmaha yar waxaa loo ogol yahay keliya hal ogolaansho sanad dugsiyeedka oo dhan laakiin labo ayaa loo ogol yahay xiliga fasaxa xagaaga.
- Ilmaha yar ma shaqayn karo illaa inay ogolaato maahee Laanta Heerarka Shaqaalaha.
- Loo shaqeeyaha ayaa ogolaanshaha ay Laantu bixisay ku haynaaya diiwaanka.

Diiwaan Haynta

Dhammaan loo shaqeeyaashu waa inay ilaaliyaan diiwaannada mushaarka saxda ah ee shaqaalaha kayar 18 sano. Diiwaannadu waa inay muujiyaan waqtiga ilmaha yar uu bilaabay shaqada, wadarta guud ee saacadaha ay shaqeeyeen, iyo waqtiga uu ilmaha yar dhameeyay shaqada maalin kasta.

Fiiro gaar ah: Shaqaalaha reer Maine ayaa sidoo kale difaac ka helaaya Sharciga Heerarka Caddaalada Shaqaalaha ee Federaalka. Si aad u hesho xog dheeraad ah, la xariir Xafiiska Mushaarka iyo Saacada ee Waaxda Shaqaalaha Maraykanka ood ka wacayso 603-666-7716 ama <http://youth.dol.gov/>.

Si aad u hesho macluumaad dheeri ah, la xariir:

Waaxda Shaqaalaha ee Maine
Laanta Heerarka Shaqaalaha
45 State House Station
Augusta, Maine 04333-0045
Teleefanka: 207-623-7900 ama 207-623-7930
Isticmaalayaasha TTY ha wacaan Maine Relay 711
Webseedka: www.maine.gov/labor/bls
limeelka: bls.mdol@maine.gov

Saacadaha Shaqada ee carruurta 14 iyo 15 jirada ah

- Ma shaqayn karaan wax ka badan lix maalmood oo xariir ah.
- Ma shaqayn karaan kahor 7 a.m.
- Ma shaqayn karaan kadib 7 p.m. inta lagu jiro sanad dugsiyeedka.
- Ma shaqayn karaan kadib 9 p.m. inta lagu jiro fasaxa xagaaga.

Marka aan Dugsigu Furnayn

- Ma shaqayn karaan wax ka badan 8 saacadood hal maalin (maalinta dhammaadka asbuuca, fasaxa, dalxiiska ama aqoon kororsiga).
- Ma shaqayn karaan wax ka badan 40 saacadood asbuucii (dugsigu waa inuu fasax yahay asbuuca oo dhan).

Marka Dugsigu Furan yahay

- Ma shaqayn karo wax ka badan 3 saacadood maalinta dugsiga, ayna ku jirto Jimcada.
- Ma shaqayn karo 18 saacood wax ka badan asbuuca uu dugsigu shaqaynaayo hal maalin ama ka badan.

Saacadaha Shaqada ee carruurta 16 iyo 17 jirada ah (ee dugsiga dhigta)

- Ma shaqayn karaan wax ka badan 6 maalmood oo xariir ah.
- Ma shaqayn karaan kahor 7 a.m. maalinta dugsiga.
- Ma shaqayn karaan kahor 5 a.m. maalinta aan dugsigu jirin.
- Ma shaqayn karaan kadib 10:15 p.m. habaynka ka horeeya maalinta dugsiga.
- Way shaqayn karaan ilaa saq dhexe marka uusan dugsiga jirin maalinta xigta.

Marka aan Dugsigu Furnayn

- Ma shaqayn karaan wax ka badan 10 saacadood hal maalin (maalinta dhammaadka asbuuca, fasaxa, dalxiiska ama aqoon kororsiga).
- Lama ogola wax ka badan 50 saacadood asbuuc kasta.

Marka Dugsigu Furan yahay

- Ma shaqayn karo wax ka badan 6 saacadood maalinta dugsiga.
- Ma shaqayn karaan wax ka badan 10 saacadood inta lagu jiro fasaxa, dalxiiska ama aqoon kororsiga.
- Maalinta ugu danbaysa asbuuca dugsiga, waxay shaqayn karaan ilaa 8 saacadood.
- Lama ogola wax ka badan 24 saacadood asbuuc kasta, marka laga reebo inay shaqayn karaan 50 saacadood asbuuc kasta oo sanad dugsiyeedka lagu fasaxay uu ka yar yahay saddex maalmood ama inta lagu jiro asbuuca koobaad iyo asbuuca ugu danbeeya sanad dugsiyeedka.

Waaxda Shaqaalaha ee Maine ayaa ku bixisa fursad loo siman yahay shaqada iyo barnaamijyada. Kaabeyaasha iyo qalabka kaalmaatiga ah ayay heli karaan dadka naafada ah markay codsadaan.